

4 waxyaabood oo ubaahan inaad ka ogaato macdanka kujira biyaha



1. Sunta macdanka oo jirka cunugaaga gasha waxay halis kutahay caafimaadkiisa.

Sunta macdanku waxay keeni kartaa ragaasnimo/ilmaha oo sifiican ukori waaya, kobac xumo iyo dhibaatooyin dhanka waxbarashada ah oo kuhabsata caruurta. Haweenka uurka leh iyo caruurtooda uurka kukoraysa sidoo kale halis ayay ugu jiraan sunta macdanka.




2. Tuubooyinka gurigaaga waxaa kujiri kara macdanka.

Meelaha ugu badan ee Macdanku ka imaado waa tuubooyinka biyaha guriga. Guryihii ladhisay intii udhaxaysay 1970 iyo 1985 ayaa laga yaabaa inay tuubooyinkoodu kujito naxaas maarta. Guryaha sidoo kale waxaa tuubooyinkooda kujiri kara maarta leh macdanka.



3. Sunta macdanka biyaha waxay halista ugu badan kuhaysaa caruurta cuntooyinka looqso.

Caruurta cuntada looqaso waxay cabaan biyo aad ufarabadan oo jirkooda le'eg. Markaad qasayso cuntooyinka ilmaha, iticmaal biyo boow, oo nadiif ah. Marna ha isticmaalin biyaha kulul ee tuubada.



4. Biyaha lacabo ayaa ah not isha ugu badan ee sunta macdanku katimaado.

Riinjiga iyo busta ay kujirto macdanka ee guryaha ladhisay kahor sanadkii 1950 ayaa ah isha ugu wayn ee sunta macdanka Portland dhexdeeda taasoo aaga sumaysa.

3 waxyaabood oo aad samayn karto si aad ehelkaaga uga difaacdo sunta macdanka



1. Kabaar sunta macdanka caruurta iyo haweenka uurka leh ee qoyskaaga.

Baarista dhiiga cunugaaga ayaa ah qaabka kaliya ee lagu ogaan karo inay qabaan sunta macdanka. Waydii dhakhtarkaaga macluumaadka baaritaanka sunta macdanka. LeadLine ayaad kahelaysaa baaritaan bilaash ah oo loosameeyo caruurta kayar 6 sano jir iyo haweenka uurka leh.



2. Kabaar biyahaaga sunta macdanka si BILAASH ah.

aaritaan lacag la'aan ayaa laga helaa Portland waxaana sido kale lasiiyaa macaamiil badan ee aaga Portland biyaha kabixiya. Kadalbo qalabka baaritaanka lacag la'aanta ah LeadLine.



3. U isticmaal biyo qaboow, nadiif ah cabitaanka, cunto karinta, ama markaad ilmaha uqasayso cuntooyinka.

- Shushub biyaha qaboow mudo 30 sakin ilaa 2 daqiiqo ah, ama ilaa ay qaboow kanoqdaan, kahor intaadan kasifayn maarta macdanka.
- Ha isticmaalin biyaha tuubada ee kulul -- biyaha kulul waxaa kujiri kara sunta macdanka.
- Waxaad sidoo kale isticmaali kartaa miire. Hubi inay macdanka miirayso, miirayaasha dhan macdanka mareebaane.

LeadLine: www.leadline.org ama wac 503-988-4000

